

Tix: GSH/B-13/12/17

QARAAR XASAANAD KA QAADISTA XILDHIBAANO

Fadhliga : 5aad ee caadiga ahayn

TAR; 31/12/2017



BAARLAMAANKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIOYA

QARAARKA GUDDIGA JOOGTADA

KU SAABSAN

XASAANAD KA QAADISTA XILDHIBAANO KA TIRSAN

GOLAHA SHACABKA

Muqdisho, December 31, 17

QARAARKA GUDDIGA JOOGTADA EE GOLAHA SHACABKA

- Markuu Arkay:** Warqadda Xeer-Ilaaliya Dawladda Lr. XXIG/AG 39/2017 ee 17.12.2017 kuna saabsanayd codsiga Xasaanad ka qaadista Xil. Xasan Macalin Maxamuud iyo Xil. Cabdisaabir Nuur Shuuriye;
- Markii uu dhegeystay:** Warbixinta koobnayd ee Xeer-Ilaaliyuhu ka hor jeediyey kulanka Guddiga Joogtada Golaha Shacabka la qabtay 21^{ka} Disembar 2017, kulankaas oo xafiiska Xeer-Ilaaliyaha laga filayey in uu ka jawaabceliyo codsigii Guddiga Joogtada ee ahaa in uu Xeer-ilaaliyuhu Guddiga horkeento ama la wadaagto caddaymaha uu arrinkan ka hayo si uu Guddigu ugu qanco sida ku qeexneyd qoraalkii ku taariikhneysnaa 19kii Disembar 2017 ee summadiisu aheyd 402/20/B-10/17.
- Markuu arkay:** In Xeer-Ilaaliyaha ka gaabsaday in uu Guddiga la wadaago caddeymaha uu hayo xafidaada galdaawadeedka awgeed;
- Markuu arkay:** In taniyo inta la og yahay oo ay Soomaaliya baarlamaano soo yeelatay aanay jirin wax xeer ah la dejiyey oo qeexaya habraaca loo marayo xasaanad ka qaadista xildhibaanada, oo ay tahay arrin ugub ah;
- Markii uu arkay:** Inaan weli la dejin sharci gaar ah ee xeeriya nidaamka ilaalinta xasaanadda iyo habraaca xasaanad ka qaadista ee uu na farayo Qodobka 70^{aad} (4) ee Dastuurka Federaalka;
- Markiuu arkay:** In dejinta Qabyoqoraalka sharciga gaarka ah ee xasaanadda lagu soo daray Qorshahawleedkii loo dejiyey bishii Oktoobar 2017 Guddiga Xeer-Hoosaadka, Xasaanadda iyo Daryeelka Xildhibaanada, qorshehawlaadkaas oo Goluhu ansixiyey 5^{thi} Disembar 2017 laguna talojiro in xeerdejinta Xasaanadda loo hawlgalo Kalfadhiga 3-aad ee Golaha Shacabka oo furmi doona Febraayo 2018;

SAA DARAADEED GUDDIGA JOOGTADA WUXUU GO'AAMIYHEY:

1. In Ilaa iyo inta si dhammaystiran loo dejinayo sharciga gaarka ah ee ku xusan Qodobka 70-aad (4) ee Dastuurka Federaalka, Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga wuxuu guddoomiyey in la joojiyo soojeedimaha xasaanad ka qaadidda xildhibaanada maadaama uusan jirin sharci gaar ah ee tilmaamaya nidaamka ilaalinta xasaanadda, habraaca loo marayo xasaanad ka qaadista xildhibaanada iyo habraaca loogu gudbin lahaa kulamada guud ee Golaha;
2. Sida ku qorshaysan Qorshehawleedka Oktoobar 2017 ee Golaha Shacabka, Guddiga Xeet-Hoosaadka iyo Arrimaha Xasaanadda, Anshaxa iyo Daryeelka xildhibaanada waxaa la faraya in uu si degdeg ah u bilaabo dejinta qabyoqoraalka sharciga gaarka ah ee xasaanadda ku xusan Qodobka 70 (4) ee Dastuurka;
3. Sida oo kale, Guddiga Joogtada ee Golaha Shacabka wuxuu farayaa in Wasaaradda Cadaaladda ee Xukuumadda Federaalka soo dhameystirka iyo soo-hordhigidda Golaha Shacabka xubnaha Guddiga Adeegga Garsoorka, ,
4. Sida oo kale, Guddiga Garsoorka, arrimaha Diinta iyo Awqaafta ee Golaha Shacabka waxaa la farayaa inuu la hawlgalo Wasaaradda si loo hirgaliyo Sharci lr 28 ku saabsan Dhismaha Golaha Adeegga Garsoorka iyo Sharci Lam 23 ku saabsan Dhismaha Maxkamadda Dastuurka kus saabsan dhismaha hay'adahan oo la'aantood dalku yeelan karin Garsoor madaxbannaan oo waafaqsan nidaamka Federaalka dalku qaatay si kalsooni lehna u gudan kara ka go'aan gaarista arrimaha saameynta balaaran ku leh Qaranka;
5. Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka waxaa la farayaa inuu gaarsiiyo Xafiisyada qaraarkani khuseeyo.

M.n Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya